**Tilmaamaha Charity Care/Foomka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha**

Kani waa codsiga caawimaada Dhaqaalaha (oo sidoo kale loo yaqaano charity care) ee ay bixiso Adeegyada Caafimaadka ee Swedish.

**Sharciga federaalka iyo kan gobalka ayaa ka doonaaya isbitaallada inay caawimaad dhaqaale siiyaan** dadka iyo qoysaska buuxsha shuruudaha gaarka ah ee dakhliga. Waxaad u qalmi kartaa daryeel bilaash ah ama qiimo jaban ayadoo ku xiran tirada iyo dakhliga qoyskaaga, xataa haddii aad haysato caymis caafimaad. Si aad u akhrido xeerkeena caawimaada dhaqaalaha iyo tilmaamaha xisaabta, fadlan booqo webseedka isbitaalka oo ah https://www.swedish.org/patient-financial-visitor-info/billing/financial-assistance.

**<u>Maxaa lagu daboolaa caawimaada dhaqaalaha?</u>** Caawimaada dhaqaalaha ee caafimaadka ayaa daboosha daryeelka caafimaad ahaan Muhiimka ah ee uu baxsho mid kamid ah isbitaallada ama rugaha caafimaadka ee kamid ah ururadeena ayadoo ku xiran u qalmidaada. Caawimaada dhaqaalaha ayaa dabooli karta dhammaan qarashaadka daryeelka caafimaadka, ayna ku jiraan adeegyada ay baxshaan ururada kale.

**<u>Haddii aad su;aalo qabto ama u baahan tahay in lagaa caawiyo buuxinta codsigaan:</u>** Xeerarkeena caawimaada dhaqaalaha, xog ku saabsan barnaamijyada, iyo agabka codsiga ayaa laga heli karaa webseedkeena ama taleefanka. Waxaad caawimaad ku helaysaa sabab kasta, ayna ku jirto caawimaada naafada iyo luuqada. Dukumiintiyada qoran ee turjuman ayaa la heli karaa marka la codsado. Sidaan ayaad noola soo xiriiraysaa: https://www.swedish.org/patient-financial-visitor-info/billing/financial-assistance Wakiillada Adeegga Macaamiisha oo oo laga helaayo: 206-320-5300 ama 877-406-0438 Isniinta-Jamcada 8am ilaa 6pm

<u>Si codsigaaga looga shaqeeyo, waa inaad:</u>

- ❑ **Na siisaa xog ku saabsan qoyskaaga**
  Qor tirada xubnaha qoyska ee gurigaaga (qoyska waxaa kamid ah dadka ay kaala dhaxayso dhalasho, guur, ama ilmaha aad korsatay ee kula nool)
- ❑ **Waa inaad nasiisaa xog ku saabsan dakhliga guud ee bishii soo gala qoyskaaga (dakhliga kahor canshuurta iyo marka canshuurta la jarto) oo ay ku jiraan risiidyada mushaarka, foomamka W-2, canshuur celinnada, waraaqaha cawimada social Security, iyo cadaymaha dakhliga aad ka hesho hantida, aadna shaacisaa noo keentaa dukumiintiyada hantida.**[1] (Arag Qaybta Dakhliga ee codsiga caawimaada dhaqaalaha si aad u hesho tusaaleyaal dheeri ah)
- ❑ **Soo dir xog dheeri ah haddii loo baahdo**
- ❑ **Waa inaad saxiixdaa aadna taariikhda ku qortaa foomka caawimaada Dhaqaalaha**

**Ogoow: Qasab maaha inaad keento lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga si aad u codsato caawimaada Dhaqaalaha.** Haddii aad na siiso lambarkaaga sooshiyaal Sikiyuuritiga lambarkaaga sooshiyaal Sikiyuuritiga ayaa loo adeegsan karaa in lagugu aqoonsado ama loo adeegsan karaa xaqiijinta xogta aad na siisay. Haddii aadan haysan lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga, fadlan ku jawaab "ima qusayso" ama "NA."

**Waa inaad codsiga aad buuxisay iyo dhammaan dukumiintiyada boostada ugu dirtaa:** Swedish Medical Center, Attn: Corporate Business Office, 747 Broadway, Seattle, WA 98122 UNITED STATES OF

[1] Marka laga reebo in sharciga gobalku diidaayo, Providence ayaa uruurin doonta oo tixgelin doonta xog ku saabsan hantida sida uu amraayo Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ee warbixinta qarashka Medicare.

AMERICA. Xaqiiji inaad nuqul diiwaankaaga ku haysato.

**Si aad codsiga aad buuxisay toos noogu keento:** Gee Xafiiska Gudoomiyaha Dhaqaalaha Isbitaalka ee kuugu dhow. Waxaan kuusoo sheegi doonaa go'aanka kama danbaysta ah ee laga gaaro u qalmidaada iyo xuquuqda racfaanka, haddii ay jiraan, inta u dhaxaysa 14 iyo 30 maalmood kadib marka aan helno codsiga buuxa ee caawimaada Dhaqaalaha, ayna ku jiraan cadaynta dakhliga.

Marka aad dirto codsiga caawimaada dhaqaalaha, waxaad noo fasaxaysaa inaan samayno baaritaanka muhiimka ah si aan u xaqiijino masuuliyadaha dhaqaalaha iyo xogta.

**Waxaan dooneynaa inaan ku caawino. Fadlan isla markaba soo dir codsigaaga. Waxaa laga yaabaa in wali laguu soo diro bayaannada biilka ilaa aan ka helno codsigaaga buuxa iyo dukumiintiyada lagaa rabo ilaa in ay diideyaan maahee sharciyada gobalkaaga ee charity care.**

SWEDISH
Extraordinary care. Extraordinary caring.™

**Charity Care/Foomka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha – Qarsoodi**

*Fadlan buuxi dhammaan xogta buuxda. Haddii aysan ku qusayn, qor "NA." Ku xariiri bogaga dheeraad ah haddii loo baahdo.*

**XOGTA BAARITAANKA**

Ma u baahan tahay turjumaan? □ **Haa** □ **Maya** *Haddii ay Haa tahay, qor luuqada aad doonayso:*

Bukaanku ma codsaday Medicaid? □ **Haa** □ **Maya** Bukaanku ma Indhool baa? □ **Haa** □ **Maya** Bukaanku Naafo miyaa? □ **Haa** □ **Maya**

Bukaanku ma helayaa adeegyada dadwaynaha ee gobalka sida TANF, Basic Food, ama WIC? □ **Haa** □ **Maya**

Bukaanku ma hooy la'aan baa hadda? □ **Haa** □ **Maya**

Baahida daryeelka caafimaadka bukaanku ma waxay la xiriirtaa shil gaari ama dhaawac shaqo? □ **Haa** □ **Maya**

**FADLAN OGOW**

- Ma damaanad qaadi karno inaad u qalmayso caawimaad dhaqaale, xataa haddii aad codsato.
- Marka aad soo dirto codsigaaga, waxaan eegi karnaa dhammaan xogta waxaana kaa dalban karnaa xog dheeri ah ama cadaynta dakhliga.
- 14-30 maalmood gudahood kadib marka aan helno codsigaaga buuxa iyo dukumiintiyada, waxaan kuu soo sheegi doonaa go'aankeena.

**XOGTA BUKAANKA IYO CODSADAHA**

| | | | |
|---|---|---|---|
| Magaca koobaad ee bukaanka | Magaca Labaad ee Bukaanka | | Magaca ugu danbeeya ee bukaanka |
| □ Lab □ Dhedig<br>□ Mid kale (waad sheegi kartaa ___) | Taariikhda dhalashada | | Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga Bukaanka (qasab maaha) |
| Qofka Masuulka ka ah Bixinta Biilka | Xariirka Kala dhexeeya Bukaanka | Taariikhda dhalashada | Lambarka Sooshiyaal Sikiyuuritiga (qasab maaha) |
| Ciwaanka Boostada<br>____________________________________<br>____________________________________<br>Magaallada Gobalka Koodhka Boostada aaga | | | Lambarada ugu muhiimsan ee lagala xiriiraayo<br>( ) ______________<br>( ) ______________<br>Ciwaanka Iimaylkaa:<br>__________________ |

Xaalada shaqada qofka masuulka ka ah Bixinta Biilka

□ **Shaqeeya** (taariikhda uu shaqada bilaabay):__________________

□ **Shaqo la'aan ah** (muddo intee dhan ayuu shaqo la'aan ahaa:)__________________

□ **Iskii u shaqaysa** □ **Arday** □ **Naafo** □ **hawlgab** □ **Nooc kale** ________________

SWEDISH
Extraordinary care. Extraordinary caring.™

| XOGTA QOYSKA | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|
| Qor xubnaha qoyska ee gurigaaga ku nool, oo aad adigu ku jirto. "Qoyska" waxaa ku jira dadka ay kaala dhaxayso dhalasho, guur, ama ilmaha aad korsatay ee kula nool. | | | | | |
| **TIRADA QOYSKA ________** | | | | | *Soo raaci bog dheeri ah haddii aad u baahato* |
| Magaca | Taariikhda Dhalashada | Xariirka Kala dhexeeya Bukaanka | Haddii uu jiro 18 sano ama kasii wayn: Magaca loo shaqeeyaha ama isha dakhliga | Haddii uu jiro 18 sano ama kasii wayn: Dakhliga guud ee bishii (kahor canshuuraha): | Sidoo kale ma codsanayaa caawimaad dhaqaale? |
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |
| | | | | | Haa / Maya |

**Dakhliga dhammaan dadka waawayn ee qoyska waa in la shaaciyaa. Ilaha dakhliga waxaa ku jira, tusaale:** Mushaaraadka- Gunnada Shaqo la'aanta- Ganacsiga- Magdhawga Shaqaalaha- Gunnada naafada- SSI- Taageerada ilmaha/Xaaska- Barnaamijyada shaqada waxbarashada ah (ardayda)- Dakhliga laga helo hantida tusaale-istoogyada, boonka, IRA-yada, hantida wadaaga ah, dakhliga kirada, iwm.

SWEDISH
Extraordinary care. Extraordinary caring.™

**Charity Care/Foomka Codsiga Caawimaada Dhaqaalaha – Qarsoodi**

## XOGTA DAKHLIGA

***XUSUUSNOOW:*** *Waa inaad soo raacisaa cadaynta dakhliga codsigaaga.*

**Waa inaad keentaa xog ku saabsan dakhliga qoyskaaga. Xaqiijinta dakhliga ayaa loo baahan yahay si loo go'aansho caawimaada dhaqaalaha. Dhammaan xubnaha qoyska ee jira 18 sano ama ka wayn waa inay shaaciyaan dakhligooda. Haddii aadan keeni karin cadayn, waxaad soo diri kartaa bayaanka qoran ee saxiixan oo qeexaaya dakhligaaga. Fadlan keen cadaynta il kasta oo dhaqaale oo la sheegay.**

**Tusaaleyaasha cadaynta dakhliga waxaa kamid ah:**

- Cadaynta jarashada canshuurta "W-2"; ama
- Risiidka bushaarka ee dhawaa *(3 bilood)*; ama
- Canshuur celinta dakhliga ee sanadkii hore, ayna ku jiraan jadwallada haddii ay jiraan; ama
- Cadaymaha qoran, saxiixan ee kasoo baxay loo shaqeeyaasha ama dadka kale; ama
- Cadaymaha dakhliga laga helay hantida (istoogyada, boonka, IRA-yada, maalgashiga, iwm); ama
- Aqbalaada/diidmada u qalmida magdhawga shaqo la'aanta.

Haddii aadan wax cadeyn ah u hayn dakhliga ama aadanba helin wax dakhli ah, fadlan lifaaqa soo raaci bog dheeri ah oo aad ku sharxayso.

## XOGTA QARASHKA

*Waxaan u adeegsanaa xogtaan si aan sawir buuxa uga qaadano xaaladaada dhaqaalaha.*

Qarashaadka Nolosha ee Aasaasiga ah:

Kirada/Daynta Guriga $___________________ Qarashka guriga $________________

Lacagaha Joogtada ah ee Caymiska Caafimaadka $___ Adeegyada Guriga $__

Daynta/Qarashaadka kale $_________________ (*taageerada ilmaha, daymaha, daawooyinka, kuwo kale*)

## XOGTA HANTIDA

*Xogtaan ayaa keliya loo adeegsan karaa si waafaqsan xeerkeena iyo sharciyada gobalka ee aad ka helayso daryeelka waxaana loo uruurshay loona tixgeliyay sida ay qabaan Adeegyada Medicare iyo Medicaid (CMS) ee soo sheegista qarashka Medicare.*

| | |
|---|---|
| Baaqiga hadda ee koontada jeega<br>$____________________________<br>Baaqiga hadda ee koontada Kaydka<br>$_____________________________ | Qoyskaagu ma haystaa hantidaan kale? **Fadlan xaqiiji inta ay quseyso oo dhan**<br>☐ Istoogyada ☐ Boonka ☐ 401K ☐ Koontooyinka kaydka caafimaadka<br>☐ Sanduuqyada Kaydka ☐ Guri (marka laga reebo kan aad dagan tahay)<br>☐ Ganacsi aad leedahay |

## FAAFAAHIN DHEERAAD AH

Fadlan soo raaci bog dheeri ah haddii ay jirto xog kale oo ku saabsan xaaladaada dhaqaalaha ee hadda oo aan ogaano, sida culayska dhaqaalaha, qarashaadka xad dhaafka ah ee caafimaadka, dakhliga xiliga gaarka ah ama ku meel gaarka ah, ama khasaaraha shaqsiga ah.

SWEDISH
Extraordinary care. Extraordinary caring.℠

## HESHIISKA BUKAANKA

Waxaan fahmayaa in Adeegyada Caafimaadka ee Swedish ay xaqiijin karto xogta ayadoo dib u eegaysa xogta daynta xogna kasoo qaadanaysa ilaha kale si ay uga caawiso go'aaminta u qalmida caawimaada dhaqaalaha ama qorsheyaasha lacag bixinta.

Waxaan xaqiijinayaa in xogta kore ay tahay run ayna sax tahay inta aan ogahay. Waan fahmayaa haddii xogta aan baxsho loo arko mid been abuur ah, in natiijadu noqon karto diidmada caawimaada dhaqaalaha, aana masuul ka noqon karo ayna tahay inaan baxsho qarashka adeegyada la i siiyay.

______________________________________ __________________________

Saxiixa Qofka Codsanaaya Taariikhda